



## KU SOO DHAWOOW DIB-U-WARSHADEYNTA WALXAHA DABICIGA AH EE DEGMADA ANOKA

Inaad kala saarto haraaga cuntada qashinkaaga waxay yaraynaysaa isticmaalka goobaha qashin-qubka, waa mid u fiican deegaanka, sidoo kalena waxaad laga yaabaa inaad lacag ka badbaadiso bilka qashinka.


Akhri si aad u ogaato hababka ugu fiican iyo talooyin kaa caawinaya dib-u-warshadaynta haraaga cuntada ee gurigaaga si guul ah.

### Waa maxay dib-u-warshadaynta walxaha dabiiciga ah, waxa maxay sababta loo samaynayo?


Walxaha dabiiciga ah waa agab dabiici ah oo si buuxda u burbura si loo sameeyo bacrimin. Dib-u-warshadaynta walxaha dabiiciga ah ma beddelayso dib-u-warshadaynta dhaqameed ee kartoona, birta, muraayadda, iyo balaastiigyada qaarkood. Beddelkeeda, dib-u-warshadaynta walxaha dabiiciga ah waa hab lagu warshadeeyo haraaga cuntada iyo alaabaha warqadda ah ee aan dib loo warshadeyn karin sida istiraashooyinka jikada, istiraashooyinka faraha, iyo tiishka wejiga lagu masaxo sida baakada pizza-da ee lagu keeno, shaandhooyinka bunka, iyo kuwa kale oo loo beddelo bacrimin la isticmaali karo.

#### MIISAANKA CUNTADA EE LA LUMIYAY


Sida loo yareeyo saameynta deegaanka ee cuntada lagu lumiyo.



Walxaha dabiiciga ah waxaa ka mid ah haraaga cuntada oo dhan, alaabta warqadda ah ee aan dib loo warshadeyn karin sida shukumaanada xanshada ah, istiraashad wejiga lagu masaxo, iyo alaabta BPI ay shahaado siisay ee lagu ururin karo alaabta bacrimi karo.



- Rootiga, xaruurka, & badarka
- Alaabta caanaha laga sameeyo
- Haraaga bunka & shaandhooyinka warqadda ah
- Ukumo, qolofa ukunta, & kartoonaada baakada ee ukunta
- Istiraashooyinka jikada, istiraashooyinka faraha & tiishka
- Hilibka, digaagga, & kalluunka
- Miraha, khudaarta, qolfoofka, lafaha, iyo jilifaha
- Qaybo laga soo jaray geedaha guriga
- Alaabo lagu bacrimi karo oo lacansiyay, sida weelasha cuntada iyo boorsooyinka lagu calaamadeeyay astaanta Machadka Alaabaha Burbura (Biodegradable Products Institute, BPI)



## ISDIIWAANGELI & BILAAW MAANTA

Raac afarta tallaabo ee sahlan ee hoos ku xusan.

1. Sawir QR kaqaad ama booqo [AnokaCountyMN.gov/Organics-Food-Scraps](https://www.anokacountymn.gov/organics-food-scrap) si aad iskudiwaangeliso.
2. Qaado qalabka BILAASHKA ah ee bilowga walxaha dabiiciga ah.
3. Uruuri walxaha dabiiciga ah boorsooyin lagu bacrimi karo oo ay BPI Shahaado Siisay.
4. Gee walxaha dabiiciga ah goobta la dhigayo.

#### XUSUSNOW

- Walxaha dabiiciga ah **waa in** lagiliya Boorso lagu bacrimi karo ama bac warqad bunni ah; tani waxay baabi'in doontaa cayayaanka iyo urta **BPI Shahaado Siisay**.
- **Ha gelinin** xarig bir ah ama balaastiig ah boorsada lagu bacrimi karo; si fudud u xiro.
- **"Haddii aad shaki qabto, iska tuur"**. Fadlan hubi in waxa aad ku riddo qashinka dabiiciga ah la oggol yahay. Marka alaab aan la oggolayn lagu rido qashinka dabiiciga ah, waxaa loo arkaa mid wasakhaysan waana in loo qaabilaa sida qashin caadi ah.



Sawir QR ah kaqaad si aad isku diwaangeliso!

## TALOYIN WAXTAR LEH



Haddii aadan awoodin inaad si joogto ah u tagto goobta lagu daayo qashinka dabiiciga ah, tixgeli inaad ku kaydiso boorsooyinka qashinka dabiiciga ah qaboojiyaha.



Ku hay 2 qashin-dabiiciyeed guriga — 1 loogu talagalay qashinka jikada iyo 1 kale loogu talagalay qashinka musqusha sida istiraashad wejiga, suufyada dhegaha, iwm.






# HARAAGA CUNTADA GOOBTA LUGU DEJIYO

Hoos waxaa ku qoran goobaha lagu dejiyo haraaga cuntada ee Degmada Anoka.

Iska diwaangeli [AnokaCountyMN.gov/organics](http://AnokaCountyMN.gov/organics) barnamijka ee kugu dhow.



Sawir QR kaqaad ama booqo [AnokaCountyMN.gov/Organics-Food-Scraps](http://AnokaCountyMN.gov/Organics-Food-Scraps) si aad iskudiwaangeliso

## XULASHOYINKA URURINTA WALXAHA DABIICIGA AH EE GURIGA HORTIISA LADHIGO

Wixii faahfaahin dheeraad ah, la xiriiir degmadaada.



Recycling & Resource Solutions  
1530 Bunker Lake Blvd NW  
Andover, MN 55304

[AnokaCountyMN.gov/Recycle](http://AnokaCountyMN.gov/Recycle)



Raadi astaantan alaabta lagu bacrimi karo ee la shahaadeeyay.



Waxaa lagu daabacay warqad 100% laga sameeyay alaabta la isticmaalay kadib.



Degmada Anoka  
MINNESOTA

Ixtiraam leh, Hal-abuurnimo leh, Mas'uuliyad Maaliyadeed Leh

# KU SOO DHAWOOW DIB-U- WARSHADEYNTA HARAAGA CUNTADA

Hagahaaga Barnamijka Dejinta  
Haraaga Cuntada ee Degmada Anoka.

[AnokaCountyMN.gov/Organics](http://AnokaCountyMN.gov/Organics)  
763-324-3400